

## **Ku soo dhowow Iswidhan iyo shaqada instegsjobb ee loogu talo galay dadka dhawaan iswidhan soo galay!**

Waa fursad loogu talo galay adigaga dhewaanta soo galay Iswidhan ee shaqada raadinaya

Haddii annu nahay xafiiska shaqada waxaannu ognahay in ay muhiim tahay in shaqo la helaa. Shirkado iyo ururro badan ayaa u baahan xoog shaqaale. Si indhaha ay ugu qabtaan cilmiga iyo khibrada aad adiga iyo dadka kale ee dhawaanta yimid ee soo galeyta ahi aad leedihiin ee aad soo bandhigaysaan, ayaa dawladdu waxay go'aamisay in kaalmo dhaqaale la siiyo shaqo bixiyaha adiga ku shaqaalaynaya.

### **Waxaad heli kartaa shaqada instegsjobb ee loogu talo galay dadka dhewaanta soo galay Iswidhan**

Haddii lagugu siiyey sharciga deggenaansha 36kii bilood ee ugu dambeysay gudahood kolkaa Waxaad heli kartaa shaqada instegsjobb ee loogu talo galay dadka dhewaanta soo galay Iswidhan. Taas micnaheedu waxa weeyi in cidda ku shaqaalaynaysa mushaharkaaga lagu siinayo lacag kaalmo oo dhaqaale oo ah 75 % ama ugu badnaan 750 karoon maalintiiba.

Shuruud lagugu xidhayo ayaa ah in aad barato afka iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeyta ah. Waana in aad marka hore nala hadashaa haddii annu nahay xafiiska xidhiidhka shaqada.

Shaqadu waxay noqon kartaa mid gelin badhkii ah (nus gellin), gelin dhan, ama shaqaalayn sii soconaysa, shaqaalayn tijaabo ah ama shaqaalayn muddo gaaban ah.

### **Halkan waxa ku yaal qawaaniin ku saabsan si aad u hesho shaqada instegsjobb ee loogu talo galay dadka dhewaanta soo galay Iswidhan**

#### **Sharciga degganaashaha**

Sharcigaaga degganaansha waxa lagugu siiyey 36kii bilood ee ugu dambeeyey gudahood. Haddii aad shaqayn kari weydey, sobobta oo ah ilmahaaga oo xannaanayey awgeed, muddediid 2 sannadood ahayd ee ilmuhu korayey, kolkaa muddedaa waxa lagu darayaa 36kii bilood.

## Iswergelinta ama is ogeysiinta xafiiska xidhiidhka shaqada

Waa in aad bilaa shaqo ahaataa isla markaana iswergelisaa oo is ogeysii-saa xafiiska xidhiidhka shaqada. Macluumaadka cidda lala xidhiidhayaa waxay ku taallaa xagga dambe ee waraaqahan.

## Af-iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeytiga ah

Waxaad dhigan doontaa af-iswidhishka loogu talo galay dadka soo galeytiga ee loo yaqaan sfi, ama waxa laguugu ballan qaaday in aad dhigan doonto.

## Ilaa inta ay socon karto shaqada

Shaqada loogu talo galay dadka dhawaanta soo galy ee instegsjobb waxa la bixinayaa ugu badnaan 24 bilood. Warbixinta dambe ee ku saabsan shaqadaas instegsjobb waxa weeyi in aad soo dhigato ugu badnaan kooraska D adoo ku baranaya waxbarashada iswidhishka ee loo gu talo galay dadka soo galeytiga taas ood ku soo dhigatay shaqada loggu talo-galay dadka dhawaanta soo ee instegsjobb.

## Shahaaded ku saabsan mushaarada iyo shuruudaha kale

Cidda shaqada ku siinaysa ama shaqo bixiyahaaga, ayaa caddaynaysa in mushaarada iyo shurrudaha kale ee shaqaalaynta la dhiibay marka la tix raaco heshiiska wadajirka ah ama ay la qiimo yihiin faa'idooyinka qaybta ama qabtaas marka la tix raaco heshiiska wada jirka.

Laakiin marka dhinaca kale laga eego qaanuunka badbaadada shaqaalaha ee LAS ma khuseeyo qofka ku shaqaalaysan taageerada shaqaalaha gaarka ah ee habka shaqada – shaqada instegsjobb ee loogu talo galay dadka dhawaanta soo galay Iswidhan.

## Arrintani mid xiiso leh ma tahay?

Haddii aad xiisaynayso shaqada instegsjobb si aad ah ayaannu kuugu soo dhaweynaynaa xafiiskayaga xidhiidhka shaqada. Annaga ayaa ka mas'uul ah dhammaan qaybaha ah inta ay leekaanayso kaalmada dhaqaale iyo inta ay soconayso shaqada instegsjobb. Waxa kale oo weliba halkan xiiso leh in shaqo bixiyuhu kula soo xidhiidho.

L axidhiidh xafiiskaaga xidhiidhka shaqada ee ku yaal meesha aad deggan tahay ama adiga ku qaabbilsan. Halkan waxaad ka helaysaa qofka

**0771-416 416**

**arbetsformedlingen.se**

**Xafiiskaaga xidhiidhka shaqada ee ku yaal meesha aad deggan tahay ama adiga ku qaabbilsan**

adigu aad la xidhiidhayso ee og dhammaan waxa ku saabsan shaqada instegsjobb. Cinwaanada booqashada waxaad ka helaysaa bogga Internetka ee ku hoos yaalla flikaan Arbetsförmedlingar: [www.arbetsformedlingen.se](http://www.arbetsformedlingen.se) Waxa kale oo weliba aad waci kartaa adeegga xafiiska xidhiidhka shaqada, dhammaan maalmaha toddobaadka: Telefoonka 0771-416 416

Immika waxaannu kuu rajaynaynaa in aad si deg deg ah u heli doonto shaqo aad jeclaato oo ka hesho!